

CHILDREN'S ADMINISTRATION
Macluumaadka Shakhsiyeed
Personal Information

MAGAC

Waa muhiim in shaqaalaha Qaybta Khayraadka Shatiyeysan (DLR) ee buuxinaya daraasada gurigaaga uu ku garto. Su'aalahan ku saabsan asalka qoyskaaga, waxbarashadaada, shaqadaada, waxa aad xiisaysid, waxa aad qiimaysid, hab-nololeedkaaga, cilaqaadyada aad leedahay, fikradaha ilmo xannaanayn, iyo ku xirnaanshada diin waa tallaabooyinka ugu horreeya nidaamkaasi. Ma jiraan jawaabo sax ama qalad ah. Haddii ay jiraan su'aalo aad doorbidaysid in aad si shakhsi ahaan ah ugu hadashid, fadlan ku muuji tani goobta banaana ee lagu siiyay.

Shaqaalahaaga daraasada guriga/shati-bixiyaha DLR wuxuu dib-u eegayaa xogtan ka hor inta uusan bilaabin daraasada gurigaaga wuxuuna u isticmaalayaa sida waxa uu ku saleynayo wada-hadalada inta lagu guda jiro nidaamka wareysiga. Fadlan sharaxaad ka bixi jawaabahaaga.

Haddii aad jeceshay in foomka aad u buuxisid hab elektaroonig ah, waxaad foomka ka soo dejisan kartaa barta internetka ee ah: https://www.dshs.wa.gov/fsa/forms?field_number_value=&title=&=Apply Geli lamarka foomka ee 15-276 si aad u soo dejiso foomkan. Waxaad email ahaan ugu diri kartaa nuqulka dokumeentiga oo saxiixan shati bixiyahaaga/shaqaalahaaga daraasada guriga iyo/ama waxaad u geyn kartaa nuqul warqad ahaan ah.

Codsade/daryeel-bixiye kasta wuxuu u baahan yahay in uu buuxiyo foomkan. Haddii ay kugu adkaato ka jawaabida qeyb kasta oo ka mid ah xogururintan ama aad u baahan tahay caawimaad dheeri ah, fadlan kala hadal tani shaqaalaha daraasada gurigaaga/shati-bixiyahaaga.

Sababta loo Codsanayo

1. Waa maxay sababta aad u doonaysid in aad u noqotid waalid korsada ilmo ama daryeelaha aan shatiga haysan ee carruurta daryeelka guriga dibadiisa lagu bixiyo?

A. Asalka Codsadaha

Xaqiiqooyinka Qoyska:

1. Halkeed ku dhalatey oo lagugu soo barbaariyey?
2. Fadlan cayin magaca(yada) iyo xiriirka (xiriirada) ee shakhsiga (shakhsiyaadka) ku soo barbaariyay:
3. Sharaxaad ka bixi cilaqaadka aad la lahayd waalidiintaada / daryeelayaashaada intii aad soo koraysay iyo cilaqaadka aad hadda la joogo la leedahay.
4. Fadlan qor magaca(yada), da'da (yada) iyo meesha (meelaha) ay joogaan dhammaan walaalahaaga. Waa maxay xiriirka aad la lahayd walaalahaaga soo koraya waa maxayna sida uu u ekyahay xiriirka aad hadda la leedahay?
5. Waa maxay xiriirka carruurta lagu meeleeeyo gurigaaga ay la yeelanayaan walaalahaaga? Ma jiraan wax walaac ah?

6. Sharaxaad ka bixi carruurnimadaada iyo sida ay ahayd noolasha gurigaaga.

7. Sharaxaad ka bixi shakhsiyadaada, ee ah sida aad isu aragtid laftaada.

8. Sharaxaad ka bixi sida qoyskaaga ama saaxibadaada ay kuu arkaan.

Waxbarasho:

1. Waa maxay darajada ugu sareysa waxbarashada ee aad soo dhammeysatay?
2. Qor liiska shahaadooyinka / heerka waxbarashada jaamacadeed oo la socda taariikhaha aad qaadatey iyo dugsiyada / macaahidda aad ka qaadatey (oo ay ka mid yihiin dibloomaha dugsiga sare ama GED).

3. Waa maxay filashooyinka khuseeya waxbarashada ee aad u hayso carruurta gurigaaga?

Taariikhda Shaqo / Adeega Milateri:

1. Ciidan maka soo adeegtay? Haa Maya

Min _____ Ilaa: _____

Laanta Ciidamada Qalabka Sida _____ Darajada _____

Nooca Fulinta Waajib _____

2. Fadlan sharaxaad ka bixi taariikhdaada shaqo adigoo ka bilaabaya shaqadaada hadda la joogo.

3. Fadlan qor liiska maalmaha iyo saacadaha toddobaadkaaga shaqo ee caadiga ah.
4. Sharaxaad ka bixi sida ku meelaynta cunug gurigaaga ay saameyn ugu yeelan karto jadwalkaaga shaqo.
5. Waa maxay qorsheyaasha aad ugu talagashay daryeelka cunug?
6. Carruurta ku jirta daryeelka guriga dibaddiisa ah waxaa dhici karta in ay leeyihiin ballamo caafimaad, booqoshooyin iyo tababarid. Sharaxaad ka bixi sida aad wax ugu qabaneysid dalabyadan waqtigaaga.

Qayimka, Yoolalka, Danaha, iyo Waxqabadyada:

1. Sharaxaad ka bixi waxa aad qiimaysid.
2. Sharaxaad ka bixi yoolalkaaga shakhsi iyo kuwa qoyskaaga.
3. Waa maxay waxa aad xiisaysid iyo/ama hiwaayaadkaaga?

Dhaqanka iyo Hiddaha

1. Sideed ugu qiimaysiin dhaqanka qoyskaaga? Asalka dhaqanka qofka waxaa ka mid ah waxyaabaha sida dhaqanka qoyska, caadada, diinta, jinsiyada, iyo hab-nololeedka.

2. Sharaxaad ka bixi sida aad ugu caawinaysid in cunug uu ilaaliyo uuna raali ka noqdo hiddahiisa/hiddaheeda.

3. Waa maxay luuqadaada aasaasiga ah?

Si qeexan ma ugu hadashaa luuqad kale? Haa Maya

Haddii ay sidaasi tahay, luuqadee/luuqadahee?

B. Xiriirada

Ninka / Lammaanaha:

1. Sharaxaad ka bixi cilaaqaadyadaada muhiimka ah iyo taariikhdaada guur/heshiis wada-noolaasho (civil union/iskaashi guri. Ku dar taariikhaha guurarka, furiinada / fasakhidda / kala-go'ida iyo sababaha uu cilaaqaadka u dhammaaday, haddii la adeegsan karo.

2. Haddii aadan guursanin, fadlan sharaxaad ka bixi cilaaqaad kasta ee laga yaabo in uu saameyn ku yeesho carruur daryeelid.

3. Sharaxaad ka bixi shirigaaga.

4. Sidee go'aamada loo sameeyaa oo loo xaliyaa khilaafka idin dhex maro adiga iyo lammaanahaaga?

5. Sideed dareemi lahayd, maxaadna sameyn lahayd, haddii cunuga lagu meeleeay daryeelkaaga uu raad ku yeesho carqaladaynta cilaaqaadkaaga?

Carruurta: (Haddii aadan haysan carruur, u gudub qeybta xigta)

1. Sharaxaad ka bixi dhammaan carruurtaada (carruurta 18 ka yar iyo kuwa qaangaarka ah), oo ay ka mid tahay da'dooda iyo goobta juqraafi.
2. Haddii carruurtaadu ay qabaan baahiyo gaar ah ama oggaanshaha cudurka, sidee loo gaaraa baahiyadaasi?
3. Sidee laga yaabaa in ay ku meelaynta cunug cusub gurigaaga ay u sameeyso carruurtaada?
4. Haddii aad haysato carruur ka yar da'da 18 ee aan kula noolayn, sharaxaad ka bixi duruufahooda, sida badan ee aad u aragtid iyo mas'uuliyada maaliyadeeda ee carruurtaasi.
5. Wax ka mid ah carruurtaada waligooda maku lug yeesheen nidaam maxkamadeed? Haddii ay haa tahay, si kooban sharaxaad uga bixi.

Kuwa kale ee ku Sugan Gurigaaga ama Hantidaada:

1. Sheeg kadibna waxaad ka bixisaa sharaxaad kooban qof kasta ee ku sugan gurigaaga ama hantidaada. Sharaxaad ka bixi sida laga yaabo in ay isku dhexgalaan cunug kasta ee laguu keeno.

- Miyay: Bixiyaan wax daryeelka carruurta ah? Haa Maya
Gaadiid ku qaadaan carruurta? Haa Maya
Bixiyaan wax kormeerka carruurta ah? Haa Maya
La yeelanayaan xiriir aan la kormeerin carruurta? Haa Maya

C. Waalidnimo iyo Khibrada loo leeyahay Carruurta

Edbin:

1. Sidee laguu soo edbin jiray markii aad yareyd?
2. Fadlan sharax hab-dhaqankaaga edbinta hadda iyo waxa aad ka aamisan tahay (carruurta ku jirta daryeelka guriga dibadiisa ah waxaa laga yaabaa in aan jir ahaan loo edbin).

Khibrad iyo Tababar:

1. Sharaxaad ka bixi khibrada aad u leedahay carruurta aan ahayn kuwaaga. Ma u leedahay wax khibrad ah in aad la shaqeeyso carruurta leh baahiyada gaarka ah?
2. Ma doonaysaa in aad ka qaybgashid tababar? Haa Maya. Haddii ay sidaasi tahay, waa maxay meelaha aad jeceshaya in aad ku tababar qaadatid?

Dhaqamada iyo fikradaha ku saabsan Xannaanayta:

1. Waa maxay dabeecadaha iyo tayoyinka ee aad ugu hesho in ay carruurta la haadaan?
2. Waa maxay dabeecadaha ama tayoyinka aad u aragto in ay aad ugu dhib badan yihiin carruurta? Sharaxaad ka bixi xaaladaha aad u aragtid in ay aad kuugu dhib badan yihiin waalid ahaan. Sharaxaad ka bixi sida aad ula tacaashey xaaladahan.

3. Waa maxay caqabadaha aad ka rajaynayso xannaanayta cunug lagu soo meeleyay daryeelkaaga?

4. Sharaxaad ka bixi cunuga aad isu arkaysid in aad barbaarisid sida da'diisa, lab ama dhedig ahaan, luuqadiisa, caafimaadkiisa, koritaankiisa, iwm.

5. Sharaxaad ka bixi sida aad u barbaarinayso oo aad u daryeelayso ilmaha leh isir, dhaqan, ama dookh galmo ka duwan kuwaaga?

6. Sharaxaad ka bixi sida aad u wadaagtiin mas'uuliyadaha xannaanayta qoyskaaga gudahiisa ah.

7. Sharaxaad ka bixi waqti noolashaada ah oo aad waysey qof muhiim ah iyo sida aad ula macaamishay waayitaankan. Sidee waayitaankan ula xiriiraa sida cunug lagu meeleyay daryeelka guri dibaddiisa laga yaabo in uu dareemo?

8. Waa maxay fahamkaaga ee waayidda ama jah-wareerka ilamaha laga yaabo in uu dareemo marka lagu meeleyo daryeelka guriga dibadiisa.

9. Ma jeclaan lahayd in aad ka qaybqaadatid la talinta cunug lagu soo meeleyay gurigaaga? Haa Maya

Sharciyada / Waxqabadyada Qoyska:

1. Waa maxay waxa uu qoyskaagu waqti-fiican qaadasho ahaan u sameeyo? Sideed ugu qaybgelinaysaa ilmaha ku jira daryeelka guriga dibadiisa ah hawlaha qoyskaaga ee caadiga ah?
2. Waa maxay sharciyada u yaala qoyskaaga (waxyaabaha la oggol yahay, kali ahaanshaha, watiga la seexdo, bandowga, iwm.)?

D. Diinta / Raacsanaanta diin Ahaan iyo Qaababka loo guto

1. Sharaxaad ka bixi dhaqamada diintaada/ruuxdaada la xiriira iyo hab-dhaqamada haddii ayba jiraan.
2. Waa maxay waxa aad filaynaysid ee ku saabsan dhaqanka diinta/rumaysanaanta ruuxaanta ee carruurta lagu meeleeeyay gurigaaga?

E. Caafimaad / Nafsaani-bulsho

1. Adiga ama qof kale ee xubin qoyska ah abad ma isticmaalay daroogo sharci darro ah ama si qaldan ma u isticmaalay daawo sharci ah? Haa Maya
Haddii ay haa tahay, calaamad saar qofka uu yahay:

<input type="checkbox"/> Aniga	<input type="checkbox"/> Aabbe	<input type="checkbox"/> Ayeeyo	<input type="checkbox"/> Ilmaha Walaalaheyga
<input type="checkbox"/> Lammaane ama Shiriig	<input type="checkbox"/> Eedo	<input type="checkbox"/> Awoowe	<input type="checkbox"/> Ilma adeeradey (abtiyaashey)
<input type="checkbox"/> Wiilashayda	<input type="checkbox"/> Adeer	<input type="checkbox"/> Habaryar	<input type="checkbox"/> Sokeeye guur
<input type="checkbox"/> Gabdhaheyga	<input type="checkbox"/> Walaalahey wiilasha ah	<input type="checkbox"/> Abti	<input type="checkbox"/> Kale:
<input type="checkbox"/> Hooyo	<input type="checkbox"/> Walaalo gabdho ah	<input type="checkbox"/> Gabdhaha walaalahey	
2. Ayadoon la tixgelinayn waqtiga laga joogo, adiga ama qof kale ee ka tirsan qoyskaaga hadda ma soo marey wax ka mid ah waxyaabahan soo-socda:

<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya	Dhibaatooyin caafimaadka jirka ah
<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya	Dhibaatooyin caafimaadka maskaxda ah iyo/ama daaweyn
<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya	Ku xadgudubka daroogo ama khamri iyo/ama daaweyn
<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya	Rabsho Guri
<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya	La talin; shakhsi ahaan iyo/ama kuwo kale (qoys, koox, iwm.)
<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya	Dagaal militeri
<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya	Ilmo dhicid ama dhalmo la'aan

 Haa kuwo kale, fadlan sharax:

Sharaxaad ka bixi jawaab kastoo "haa" ah, oo ay ka mid yihiin ogaansho cudur, taariikho, natiijo daaweyn, iyo/ama ku lug lahaanshaha sharci fulin.

3. Adiga ama qof ka mid ah qoyskaaga maku lug yeeshay Adeegyada Ilaalinta Ilmaha (CPS)? Haa Maya
Haddii ay haa tahay, fadlan sharaxaad ka bixi:

4. Sigaar cabidda ma laga oggol yahay gurigaaga? Haa Maya

F. Guriga iyo Deriska

1. Wax intee la'eg ayaad ku nooshahay gurigaaga/xaafadaada hadda la joogo?
2. Ma waxaad isticmaashaa nidaamka biyaha dadweynaha ama mid gaar loo leeyahay?
3. Maka jiraan wax khataro suurtagal ah gurigaaga ama hantidaada?
4. Qor liiska dhammaan xayawaanada guriga lagu rabaayadeeyo ama xayawaannada kale ee guriga jooga.
5. Xayawaanadan rabaayadda ah ama xayawaannada ammaan ma tahay in ay carruurta la joogaan? Haa Maya. Haddii kale, waa maxay qorshaha looga ilaalinayo xayawaanadan carruurta?

G. Nidaamka Taageerada

1. Kumaad taageero ahaan u isticmaashaa? Sharaxaad ka bixi goor nidaamka aad taageerada ka hesho uu ku caawiyo.
2. Xubin ka mid ah nidaamka aad taageerada la hesho ma gaari karaa cunuga lagu soo meeleeay gurigaaga? Haddii ay haa tahay, fadlan sharaxaad ka bixi.

H. Dhaqaalaha Qoyska

1. Ma dareemaysaa in aad daryeeli kartid cunug kale taageero maaliyadeed oo dheeri ah la'aan? Haddii ay haa tahay, taageero maaliyadeed nooc ee ayaad u baahan tahay?
2. Miyaad helaysaa nooc kaloo taageero maaliyadeed ah? Haa Maya
Haddii ay haa tahay, fadlan sharaxaad ka bixi:

I. Suurtogalnimada in la Joogteeyo

OGOW: DLR waxay u dhammeystiraysaa Daraasado Guri Midaysan codsadayaasha oo dhan. Daraasadahan guriga waxay u oggolaadan qoys labadaa meelayn iyo korsasho.

1. Sharaxaad ka bixi sida aad u taageeraysid aadna ugu qaybqaadanaysid dib ula midoobid badbaadsan ee cunuga walidiintiisa/walidiinteed ama kaafalaqaadyadooda la yeelanayaan.
2. Fadlan sharaxaad ka bixi fahankaaga joogteynta ee loogu talagalay cunuga kujira daryeelka guriga dibaddiisa ah (dib ugu noqosho guri, korsasho, kaafalaqaadid, daryeelka korsasho ee mustaqbal fog).
3. Sideed u taageeraysaa qorshaha joogtada ah ee cunuga; marka aadan la oggolayn?
4. Fadlan sharaxaad ka bixi waxa fikradda guud ee korsashada / kaafalaqaadida/daryeelka korsashada mustaqbalka fog sida " habka koritaanka iyo ballan-qaad ee waarta" uu kuula micna yahay.
5. Sharaxaad ka bixi sida aad u maleynaysid in cunug uu yeelanayo dareen jahawareer aqoonsi iyo lumid oo ku taxaluqa kala-noolaanta waalidka dhalay iyo sida cunuga laga yaabo in uu u muujiyo dareenkan ama akhlaaqdan. Fadlan sharaxaad ka bixi sida aad ugu caawinaysid cunug in uu ula macaamilo jahawareerkan aqoonsi iyo lumida.
6. Sharaxaad ka bixi muhiimada isku xirka walaal ay u leedahay cunug lagu meeleyay daryeel gur dibadda ah.
7. Haddii cunuga lagu meelayey gurigaaga uusan ku noqon Karin gurigooda, ma tixgelinaysaa in aad u noqotid il meelayn joogto ah? Fadlan sharaxaad ka bixi sababta ama waxa kuu diiday.

8. Ma tixgelin lahayd in aad u noqoto il meelayn walaalaha cunuga oo aanan lagu meelaynin gurigaaga?
9. Ma oggolaan lahayn heshiis wada-hadal oo furan cunug laga yaabo in aad korsatid, aad kaafalaqaadid ama heshiis daryeel korsasho mustaqbalka fog ah oo la yeelatid waalidiinta dhalay iyo/ama walaalahooda la garanayo? Haa Maya
Fadlan sharaxaad ka bixi sababta ama waxa kuu diiday.
10. Fadlan sharaxaad ka bixi sida aad u qorshaynaysid in aad u sheegtid korsasho/kaafalaqaadid/daryeel korin cunug.
11. Fadlan sharaxaad ka bixi sida aad u xaalaynaysid su'aalaha cunuga ee ku saabsan waalidiinta dhalay iyo qarabadiisa.
12. Fadlan sharaxaad ka bixi sida cunuga qoladiisa, jinsiyadiisa, iyo hiddaha iyi dhaqankiisa laga yaabo in ay saameyn ugu yeelato qoyskaaga iyo cunuga.
13. Fadlan sharaxaad ka bixi qorshahaaga haddii ay dhacdo in aadan awoodin in aad sii-wadid daryeelka carruurta lagu meeleyay gurigaaga.

J. U gaar ah Cunuga

Fadlan buuxi qeybtan marka cunug la aqoonsaday lagu meeleyo ama la rabo in lagu meeleyo gurigaaga.

1. Fadlan sharaxaad ka bixi cunuga gaarka ah ee aad codsnaysid in aad u noqo il meelayn.

2. Fadlan sharaxaad ka bixi fahankaaga taariikhda gaarka ah ee cunuga iyo baahiyadiisa hadda la joogo.

3. Fadlan sharaxaad ka bixi taageerada laga yaabo in aad u baahanto haddii cunuga lagu meeleeyo gurigaaga.

4. Fadlan sharaxaad ka bixi fahankaaga sababta ilmaha loo geliyay meelaynta guriga dibadiisa ah.

K. Waa maxay xogta kale ee aad jeceshahay in aad nala wadaagtid?

SIXIIXA

TAARIIKHDA